

# Hagista Ka-reebitaanka Kooban ee COVID-19 ee Dugsiyada K-12

Werinta 12/31/2020

## BANDDHIGIDA

Ardayga ama shaqaalaha waxaa haya jirro leh uqu yaraan hal astaan oo aasaasi ah oo cudurka COVID-19 10-kii maalmood ee ugu dambeeyay, mana uusan la xiriirin qof qaba COVID-19 14-kii maalmood ee la soo dhaafay.

Ardayga ama shaqaalaha waxaa haya jirro leh uqu yaraan hal astaan oo aasaasi ah oo cudurka COVID-19 10-kii maalmood ee ugu dambeeyay, mana uusan la xiriirin qof la xaqiijiyay inuu qabo COVID-19 14-kii maalmood ee la soo dhaafay.

Ardayga ama shaqaalaha waxaa haya jirro aan lahayn astaamaha aasaasiga ah ee COVID-19 sida shuban-biyood, matag, madax-xanuun, ama firiirc

Ardayga ama shaqaalaha ma jirrana, balse wuxuu u-baylah noqday kiis qabo COVID-19.

Ardayga ama shaqaalaha wuxuu leeyahay xubin qoyseed oo jirran oo leh astaamaha COVID-19 balse aan la xaqijin inuu qabo cudurka ama la saadaalin karo.

Ardayga ama shaqaalaha waxaa lagaga helay COVID-19 baaritaan cudur.

## TALAABADA

Ka reeb dugsiga. Kula tali baaritaanka fayraska iyo u diritaanka daryeel-bixiye caafimaad si loo qiimeeyo.

Qofkan jirran wuxuu qabi karaa COVID-19. Ku goonihey guriga ugu yaraan 10 maalmood tan iyo marka astaamuhu bilawdeen, oo 24 saacadood qandho la'aan ha ahaado, oo astaamuhu ha reystaan. Waaxda caafimaadka bulshada ee deegaanka ayaa baari doonta.

Ka reeb sida ay qabaan tallooyinka ka-reebitaan ee dugsiga. Kula tali u diritaanka daryeel-bixiye caafimaad haddii astaamaha ay sii socdaan wax ka badan hal maalin.

Haddii xubinta qoyska ka tirsan ee jirran uu leeyahay ugu yaraan hal astaan oo cudurka COVID-19 oo baaritaan cudur oo kale ku ogaan daryeel-bixiye caafimaad sababta keentay jirrada qofka...

Haddii xubinta qoyska ka tirsan ee jirran uusani lahayn astaamo aasaasi ah oo cudurka COVID-19, ama astaamo badan oo aasaasi ah oo cudurka COVID-19 oo oggaansho cudur kale oo aan khuseyn neefsasho oo cad uu sameeyay daryeel-bixiye caafimaad, ardayga ama xubinta shaqaalaha way iman karaan dugsiga.

Qofkan wuxuu qabaa COVID-19. Ku goonihey guriga ugu yaraan 10 maalmood tan iyo taariikhda baaritaanka, oo 24 saacadood qandho la'aan ha ahaado, astaamo kastana ha reystaan. Waaxda caafimaadka bulshada ee deegaanka ayaa baari doonta.

## SHURUUDAH SOO NOQOSHADA

Haddii qoflagaa **waayo** cudurka COVID-19, wuxuu ku laaban karaa dugsiga kadib marka astaamaha reystaan oo qansho la'aan ahaado 24 saacadood.

Haddii qofka **aan laga baarin ama laga helin** cudurka COVID-19, waa inuu guriga ku nagaadaa ugu yaraan 10 maalmood tan iyo marka astaamuhu bilawdeen, oo 24 saacadood qandho la'aan ha ahaado, oo astaamuhu ha reystaan.

Haddii daryeel-bixiyaha caafimaad qofka kula taliyo inuu ku noqon karo dugsiga, qofku wuu laaban karaa sida ay qabto talobixinta qoran ee bixiyaha.

Haddii uusan arkin daryeel-bixiye caafimaad, wuxuu laaban karaa sida ay qabaan talaaabooyinka ka-reebitaan ee dugsiga.

Ardayga ama shaqaalaha waa inuu waa inuu karantiil galaa 14 maalmood kadib taariikhdi ugu dambaysay ee u-baylah noqoshada kiis qaba COVID-19. Tixraac RSSL "Qorsheynta Dulucyada COVID-19 ee ku jira ee Dugsiyada" si aad u hesho hagis dheeraad ah.



**OREGON  
DEPARTMENT OF  
EDUCATION**

Oregon achieves . . . together!

## Qeexitaano Muhiim ah

Astaamaha aasaasiga ah ee COVID-19 waxaa ka mid ah kuwan soo socda:

- Qandho gaaraysa 100.4°F ama ka sareysa
- Qarqaryo
- Qufac
- Neef-qabasho
- Neef-ku-dhag
- Lumintaanka dhadhanka ama urta ee cusub

**Qandho la'aan** waxaa loola jeedaa heerkul ka yar 100.4°F iyadoo aan la isticmaalin xanuun-baa'bi'ye.

**Karantiilka** wuxuu soocaa oo xaddidaa dhaqdhaqaqa dadka u-baylah noqday cudur faafa si loo arko inay jirradaan iyo in kale.

**Gooniyeynta** waxay ka soocdaa qof jirran oo qaba cudur faafa dadka aan jirraneyn.

**Kiis la xaqiijiyay** waxaa loola jeedaa qof looga helay cudurka baaritaanka cudur ee COVID-19.

**Kiis la saadaalin karo** waxaa loola jeedaa qof aan looga helin cudurka baaritaanka cudur ee COVID-19 balse qaba astaamo kadib u-dhowaanshaha kiis la xaqiijiyay inuu qabo COVID-19.